

Waxa aad ka ogaaneyso

Codeynta La Awoodo ee Maine

- ★ Shuruucda federaalka iyo kuwa gobolku waxay farayaan in hannaanka codbixinta ay helaan dadka oo dhan.
- ★ Dhammaan goobaha codbixinta ee kuyaala Maine waa in si toos ah loo adeegsan karo.
- ★ Codbixiyeyaashu waxay xaq u leeyihii inay helaan qof ka caawiya inay buuxiyaan warqadooda codbixinta.
- ★ Haddii aad rabto inaad u codeyso si gaar ah oo madax bannaan, waxaad adeegsan kartaa Nidaamka Codbixinta La Awoodo.
- ★ Gobolka Maine ayaa bixiya “Codaynta Maqanaha Elektarooniga ah ee La Awoodo” oo loogu talagalay dadka naafada ah ee ay ku adkaan karto inay buuxiyaan warqadda codbixinta.

Waa Maxay Nidaamka Codbixinta La Awoodo ee Maine?

- ★ Gobolka Maine wuxuu leeyahay ExpressVote oo ah Nidaamkiisa Codbixinta La Awoodo (AVS). Dhammaan goobaha codbixinta waxaa looga baahan yahay sida uu dhigayo Xeerka Caawinta Codbixinta Mareykanka (HAVA) inay ka dhigaan nidaamka AVS mid la heli karo maalinta doorashada. Nidaamka ExpressVote:
 - ✓ Waa aalad lagu calaamadeeyo warqadda codbixinta oo u sahleysa dadka naafada ah inay ku codeeyaa si gaar ah oo madax-bannaan;
 - ✓ Waxay kuu oggolaaneysaa inaad kala doorato shaashadda taabashada iyo kiiboodh oo leh codka maqalka;
 - ✓ Waxay kuu daabacaysaa warqaddaada codbixinta ee dhammeystiran oo;
 - ✓ kumana xirna intarneedka.

Waa maxay waraaqaha codbixinta maqanaha elektarooniga ah ee la awoodo?

- ★ Haddii aad rabto in aad codkaaga ku dhiiabato warqadda codbixinta maqanaha oo aad qabto naafso taasoo adkeynaysa inaad isticmaasho warqadda codbixinta, waxaad codsan kartaa warqadda codbixinta maqanaha ee la awoodo.
 - ① Wuxaan codsan kartaa warqadda codbixinta Maqanaha ee La Awoodo ee Elektarooniga ah ilaa saddex bilood kahor doorashada.
 - ② Si aad u buuxiso warqadda codbixinta, waa in aad haysataa khad intarneed iyo aalad elektaroonig ah.
 - ③ Kadib marka aad cadsato warqad codbixin, waxaa iimayl laguugu soo diri doonaa tilmaamaha ku saabsan sida loo dhammeystiro.

Kheyraad Dheeraad Ah

- ★ Si aad waxbadan uga ogaatid codbixinta la awoodo ee Maine, iskaangaree koodhka QR ee hoose.



**DISABILITY
RIGHTS
MAINE** 

Wax su'aalo ah? Booqo: <https://drme.org/voting>

Iimayl u dir: advocate@drme.org

Wac: 207.626.2774 (V/TTY); 800.452.1948 (V/TTY);
207.766.7111 (VP)